**Isbahaysiga Dib U Xoreynta Soomaaliya**

**تحالف إعادة تحرير الصـومـال**

The Alliance for The Re-liberation of Somalia

---

## BAAQ KU WAJAHAN SHACABKA SOOMAALIYEED

Isbahaysiga dib u Xoreynta Soomaaliya waa urur Siyaasi ah oo nabadeed oo la dhisay in uu fagaarayaasha caalamiga ah ku metelo bulshadda Soomaaliyeed, isla markaana Beesha Caalamka ka dhaadhiciyo qadiyadda Soomaaliyeed ee dulman.

Ujeeddooyinka Isbahaysiga waxaa ka mid ah ka shaqeynta sidii ciidanka Ethiopia waddanka looga saari lahaa dariiq kasta oo suurto gal ah, sida ku cad xeerka Isbahaysiga qodobadiisa 6,7,8. Dariiqooyinkaas waxaa ka mid ah in Beesha Caalamka laga fahamsiiyo aragtida Isbahaysiga ee ku aaddan xal u helidda mushkiladda Soomaaliya.

Waxaan Shacabka Soomaaliyeed uga cudur daaranaynaa kana raali gelinaynaa hadallada aan munaasibka ahayn oo aan lagu farxi karin oo kasoo yeeraya xubno ka tirsan Isbahaysiga, waxaanna u ballan qaadaynaa in aan la harayn wixii dadaal ah ee arrinkaasi lagu xallin karo.

Waxaan ugu baaqaynaa xubnaha Isbahaysiga ee ka muujiyey dareenkan filan waaga ah wada xaajoodka ka socda dalka Djibouti in ay dhowraan nidaamka iyo kala dambeynta, isla markaana ilaaliyaan xeerka Isbahaysiga, una turaan dareenka iyo damiirka Shacabka Soomaaliyeed oo ay daashadeen khilaaf iyo is qabqabsi an dhamaad lahayn.

Wixii talo ama dhaliil ah oo Isbahaysiga dhexdiisa ah waxaa lagu saxayaa qaabka iyo nidaamka u degsan Isbahaysiga, waxaana ka codsaday Guddoomiyaha Golaha Dhexe inuu si degdeg ah isugu yeero xubnihii Golaha Dhexe laguna qabto kalfadhigii 2aad ee Golaha Dhexe dalka Djibouti.

Dowladda iyo Shacabka Eritrea waxaan uga mahad celineynaa sidii geesinnimada lahayd oo ay u garab istaageen qaddiyadda Soomaaliya xilli ay dunida oo dhami irdaha ka xiratay, sidoo kale waxaan abaal weyn uga haynaa gogoshii ay u fidiyeen Soomaalida si ay u qabsadaan Shirweyne ay ugu tashanayaan aayohooda iyo hoyga ay siiyeen xubnaha Isbahaysiga.

Waxaa nasiib darro ah oo aan aad uga xunnahay in ay dawladda Eritrea ku dhaqaaqday wax aan laga filayn kadib markii ay isku dayday in ay fara geliso muujisayna rabitaankeeda iyadoo ka shaqaysay qaybinta iyo iska hor keenka madaxda iyo xubnaha Isbahaysiga meeshii ay ka shaqayn lahayd wanaaga iyo midnimada xubnaha Isbahaysiga.

Isbahaysiga dib u Xoreynta Soomaaliya waxaa loo dhisay in uu dalka ka xoreeyo gumeystaha kusoo duulay iyadoo la adeegsanayo maskax xor ah oo ka turjumaysa rabitaanka iyo danaha Shacabka Soomaaliyeed, waana soo dhoweyneynaa cid kasta oo wax taraysa qadiyadda Soomaaliyeed cidna kama oggolaanayno in ay marin habaabiyaan habsami u socodka howlaha Isbahaysiga.

Dowladda Eritrea waxaan nahay saaxiib waxayna nagu leedahay abaal aan la illoobi karin, hase yeeshee talada waxaa iska leh Soomaalida, waxaana ka codsanaynaa in ay dib uga fiirsato mowqifka aan wanaagsanayn oo ay qaadatay, Isbahaysigana ay kala xiriirto madaxdiisa, hana ogaato in aysan wax dan ahi ugu jirin iyada iyo annagaba burburka iyo kala taga Isbahaysiga dalkeeda lagu dhisay.

Waxaa noo muuqata fursad wanaagsan oo looga faa'iideyn karo Ummadda Soomaaliyeed haddii loo fekero si haboon oo ka fog caadifad iyo danaysi.

Waxaan u aragnaa tallaabada beesha caalamku ay haatan isugu soo taagtay una garawsatay in Ethiopia ay tahay caqabadda ugu weyn ee hor taagan xalka arrinta Soomaaliya loona baahanyahay in Soomaaliya laga saaro, in ay tahay tallaabo loo qaaday xagga wanaagga, ayna haboon tahay in la meel mariyo.

Waxaan Beesha Caalamka u caddayneynaa in ay Ethiopia leedahay rabitaan weyn oo ah in ay haysato dalka Soomaaliya aysanna doonayn in ay ciidamadeeda kala baxdo dalka Soomaaliya, taasina waxay ku caddahay warkii uu ku hadlay Melles Zenawi 22 May 2008 oo uu ku sheegay in uusan ciidamadiisa kala baxayn dalka Soomaaliya. Arrinkaasna wuxuu caqabad ku yahay hindisaha nabad raadinta ee uu wado Wakiilka Qaramada Midoobey Mudane Axmed weld Cabdalla.

Waxaan si weyn u soo dhoweyneynaa warbixintii guddiga qaabilsan la socodka cuna qabateynta hubka ee Soomaaliya uu ka jeediyey Golaha Ammaanka, taas oo si cad u qeexeysay xad gudubyada ay geysanayaan Gumeysiga Ethiopia iyo meleesiyaadka TFGda. Sidoo kale waxaan taageereynaa tala soo jeedintii guddiga ee ahayd in la magacaabo guddi xaqiiqo raadin ah oo soo baara dembiyada dagaalaka, iyo in joogitaanka ciidamada Ethiopia uu xadgudub ku yahay go'aanka Golaha Ammaanka ee cunaqabataynta hubka Soomaaliya, taas oo ay caadeysteen in ay jebiyaan dhowr iyo tobankii sano ee la soo dhaafay.

Waxaa lagama maarman ah in ay Ethiopia dalkeenna isaga baxdo, Soomaaliduna aayaheeda u tashato lana soo celiyo madax bannaanida iyo qarannimada Ummadda Soomaaliyeed. Beesha caalamkuna waa in ay tix geliyaan rabitaanka shacabka Soomaaliyeed una soo jeestaan wax ka qabashada dhibaatada Soomaaliya.

Isbahaysiga waxaa ka go'an inuu ka fekero kala doorashadda laba sharood; taas oo ay siyaasadda sharciga ah iyo waaqaca siyaasiga ahba ay keenayaan. **Sheekh Ibnu Taymiya ayaa yiri " Ruuxa Caaqilka ahi wuu kala gartaa khayrka iyo sharka, laakiin Xakiimku waa ruuxa laba shar kala dooran kara".**

Waxaan aamin sannahay in ay nasaaran tahay masuuliyad weyn oo u baahan in si aad ah looga fekero, si xilkasnimo lehna wax la isugu miisaamo. Isbahaysigu isagoo taa ka duulaya ayuu go'aansaday inuu wadahadal ka galo wax kasta oo Ethiopia dalka looga saari karo.

Waxaa kaloo muhiim ah in aan hoosta ka xariiqno in midnimadda, madaxbanaanidda iyo qaranimadda Soomaaliya ay halis ku jirto, sidaas darteedna ay waajib tahay in la badbaadiyo, taasina ay tahay baahidii keentay in la go'aansado halganka iyo muqaawamada, waxaana naga go'an in halgankaas uu sii socdo inta laga xaqiijinayo baahidii keentay.

Waxaan maanta halkan Ummadda uga Caddaynaynaa in aan dooranay jidka wadahadalka iyo muqaawamadda oo wada socda, qaadanayna wixii dhibaatada Soomaaliya lagu dhamayn karo ama lagu soo celin karo madaxbanaanidii, sharafteedii iyo qarannimadeedii Soomaaliya.

Waxaan rejeyneynaa in uu guuleysto shirka dib u heshiisiinta, kana ka soo baxaan natiijo wanaagsan oo waxtar u leh Shacabka Soomaaliyeed.

Waxaan ugu baaqaynaa Beesha Caalamka:

1- In ay xoogga saaraan sidii dalka Soomaaliya loga saari lahaa ciidamada Ethiopia.
2- In Shacabka Soomaaliyeed ee tabaalaysan degdeg loo gaarsiiyo kaalmo banii aadanimo.
3- In laga shaqeeyo sidii shacabka Soomaaliyeed ee laga qixiyey guryahooda dib loogu soo celin lahaa.

Waxaan si aad uga mahad celineynaa Dowladda iyo Shacabka reer Djibouti sida wanaagsan ee had iyo jeer u garab taagan yihiin shacabka Soomaaliyeed ee walaalahood ah uguna howlan yihiin xal u helidda mushkiladooda.

Ugu dambayntii waxaa hubaal ah oo aan si aad ah ugu kalsoonnahay in uu shacabka Soomaaliyeed guusha leeyahay Inshallah uuna beegsanayo hal ku dheggeenna ah: **XORNIMO, NABAD, MIDNIMO.**

**Sheikh Sharif Sheikh Axmed**
**Guddoomiyaha Isbahaysiga**

Djibouti, May 25th , 2008